

Macallimiintu waxay soo diri doonaan shaqooyinka 9:00 markay tahay SeeSaw waxayna ku hawlan yihiin horumarinta xirfadda maalintii. Macallimiintu waxay eegi doonaan iimaylkooda iyo xisaabaadka SeeSaw laba jeer maalintii (qadada kadib iyo 4:00).

Ardayda dugsiga hoose waa inay galaan SeeSaw wixii ka dambeeya 9:00 subaxnimo si ay u dhammaystiraan waajibaadka macallinkoodu (macallimiintooda) dhejiyay. Ardaydu waa inay galaan SeeSaw maalintaas si loogu tiriyo inay joogaan. Haddii ilmahaagu ku adag yahay gelitaanka, fadlan iimayl u dir macallinka ilmahaaga.

Fasallada 6-8

Jimcaha, 1-da Oktoobar waa Maalinta Casharada Onlaynka. Taas micnaheedu waa in ardayda ay wax ku baran doonaan guriga maalintaan. Ardayda dhigata fasallada 6-8 waa inay galaan Schoology 9:00 subaxnimo si' ay u bilaabaan maalintooda iskuulka. Casharada waxaa lagu bixin doonaa onlaynka, iyada oo loo marayo Schoology. Ardaydu waxay ka geli doonaan mid walba oo ka mid ah fasalladooda Schoology si' ay u helaan casharadii la soo dhigay maalintaa.

Ardaydu waa inay raacaan tilmaamaha lasoo dhigay ee fasal walba oo ay dhameeyaan maalintaas casharadeeda. Marka dhammaan shaqadu dhamaato, ardaydu waa inay u diyaar garoobaan inay ka warbixiyaan wixii ay barten iyagoo dhammaystiraya foomka xaadiriitaanka ee fasalkooda 6-aad.

Haddii ardaydu ay qabaan su'aalo ku saabsan shaqooyinkooda Jimcaha ee 1-da Oktoobar, waxay kula xiriiri karaan macallinkooda Schoology AMA kula kulmi karaan maalintaas oo dhan Google Meet iyagoo adeegsanaya furayaasha kulanka soo socda ee caawinta:

North and Kennedy = NorthEagles

South = SouthTigers

Riverwoods = Riverwoods

Fasallada 9-12

Jimcaha, 1-da Oktoobar waa Maalinta Barashada Onlaynka. Taas micnaheedu waa in ardayda ay wax ku baran doonaan guriga maalintaan. Ardayda fasallada 9--12 waa inay galaan Schoology inta u dhaxaysa saacadaha 9:00--3:15 si ay u dhameeyaan shaqooyinka uu soo dhigay macallinkooda iyadoo loo qorayo inay joogeen maalintaa. Ardayda qasab kuma aha inay galaan fasal walba wakhtiisii. Dhammaan tilmaamaha maalintaa shaqadeeda waxaa laga heli doonaa

Schoology. Haddii ardaydu qabaan su'aalo, waxay kula xiriiri karaan macallinkooda Schoology ama waxay gali karaan Google Meet-ka iskuulkooda inta u dhexeysa saacadaha 9:00--3:15 si ay u helaan kaalmo la taaban karo oo la xiriira shaqadooda maalintaas oo dhan

Apollo = ApolloEagles

Tech = TechTigers

McKinley = McKinleyPanthers

REC = RECbase

Ardayda dugsiga sare waxay ku hormari doonaan fahamkooda loo mari Shaqada & Kolleejka iyagoo abuuri, ama ballaarin faylalkooda ugaarka ah ee Google. Tilmaamaha oo dhan, oo ay ku jiraan fiidiyoow caawin, waxaa lasoo dhigi doonaa Schoology. Ardaydu waxay kaloo fursad u heli doonaan inay ka shaqeeyaan casharada taagan ama ay dhameeyaan casharadii ay gafeen ee fasalladooda.

Iyadoo ay sabab u tahay xeerka doowladda federaalka darteed, wax cunto ah lama bixin doono Jimcaha. Waxaan ku dhiirigelineynaa qoysaska ama ardayda inay la xiriiraan maamulaha iskuulkooda ama la-taliyahooda haddii walwal cunta ah ay jiri doonto.